**Is-faaruqinta kahor baarista Malawadka iyo Mindhicirka weyn**

Si sida ugu wanaagsan loogu arko xuubabka mindhicirka inta baaristu socoto, waa muhiim in mindhicirku marnaado. Kasoo gado CitraFleet ama Picoprep farmashiyaha (calool-socodsiiye aan u baahnayn warqad dhakhtar). Ha raacin qaab-isticmaalka ku qoran baakadka! Raac qaab-isticmaalkayaga ku qoran boggaan.

**Ogow**: Ha qaadan kiniiniyaasha birta, ha cunin rootiga laga sameeyey badarka/miraha kitaanka iyo iniinyaha yaryar ee ku jira fawaakihda iyo miraha tuutka 5-ta beri ee ka horreysa baarista waayo taasi waxay nagu adkaynaysaa baarista mindhicirka.

## Maalinta ka horreysa baarista:

Waad cuni kartaa quraac fudud aroorta hore subaxdii. Maalinta inteeda kale waa inaadan wax cunin, waxaad cabbi kartaa oo kaliya sharaab saafi ah (biyo, saafti, kafee, shaah, biyaha macdanta, maraq). **Iska ilaali** waxyaabaha laga sameeyey caanaha iyo casiirka leh gufaarka, sidoo kale iska ilaali saaftiga tuutka (blåbærsaft) iyo saaftiga suulbaarka (solbærsaft) maadaama ay kuwaasi midab ku samayn karaan waxa ku jira mindhicirka.

***Haddii lagu baarayo inta ka horraysa saacadda 12:***

**Qiyaasta 1 waxaa la qaadanayaa saacadda 14-16 ee maalinta ka horraysa baarista**

**Qiyaasta 2 waxaa la qaadanayaa saacadda 20-22 ee maalinta ka horraysa baarista**

***Haddii lagu baarayo saacadda 12 kadib:***

**Qiyaasta 1 waxaa la qaadanayaa saacadda 20-22 ee maalinta ka horraysa baarista**

**Qiyaasta 2 waxaa la qaadanayaa subaxnimada maalinta lagu baarayo**

**Qiyaasta 1:**

Ku dar walaxda ku jirta bacda/baakadka koowaad koob ay ku jiraan 1,5 dl. oo biyo qabow ah. Walaaq 2-3 daqiiqadood. Isku-darku waxaa uu u muuqdaa wax isku qasan. Cab dareeraha. Cab 2-3 litir oo ah sharaab saafi ah ilaa laga gaarayo waqtiga qiyaasta 2.

**Qiyaasta 2:**

U qaado qiyaastan sida ku qeexan qiyaasta 1 oo kale.

Markaas kadib cab 2-3 litir oo ah sharaab saafi ah.

- **Maalinta baarista**
- Aad u cab sharaab saafi ah ilaa laga gaarayo baarista.

Medisinsk poliklinikk t: 2322 5720

Koloskopi 01-2020 Somali

# Baarista Malawadka iyo mindhicirka weyn



## OGOW! Warbixin muhiim ah:

- Waa inaad soo faaruqiso mindhicirka intaan hawshaan la gelin – ka eeg meesha lagu qoray taas. Haddii aan loo bannayn mindhicirka sidii la rabay waxaa dhici karta in aan baaristaan la fulin karin ama ay noqoto mid aan laga faa'idin..
- Waa inaad cunto-cunistaada wax ka baddashid 5-ta maalmood ee ka horreysa baarista – ka eeg meesha lagu qoray taas.
- Haddii aad qaadatid dawada dhiigga jilcisa, waxaa dhici karta in dawooyinkaas la yara hakiyo – ka eeg meesha lagu qoray taas.

Lovisenberg Diakonale Sykehus

**Waa maxay koloskopi?**

Koloskopi waa baarista lagu sameeyo malawadka iyo mindhicirka weyn. Tuubbo loodsamaysa ayaa lasoo dhexmariyaa malawadka. Waxaa baarista lagu arki karaa isbeddellada gudaha malawadka iyo mindhicirka weyn, burooyin ama nabarro ku yaal xuubka ayaa la heli karaa.

**U diyaargaroobidda baarista**

1. **Is-faaruqinta: Eeg bogga ugu dambeeya.**
2. **Cunto iyo cabitaan: Ee bogga ugu dambeeya.**

**Dawooyin iyo jirrooyin kale**

Waa inaad na siisaa wixii warbixina oo ku saabsan dawooyin aadan u adkaysan karin, iyo jirrooyin aad qabtid sida xanuunka wadnaha in dhiiggu ka hakado (angina pectoris), cillad wadnaha ah, dhibaatootin dhiig-bax, maadaama ay taasi saamayn ku yeelan karto doorashada hawl-qabadka.

**Dawooyin saameeya muddada dhiig-baxa:**

- Haddii aad isticmaashid **Albyl-E,** waad sii wadi kartaa inaad qaadatid ilaa maalinta baarista haddii aan laguu sheegin farriin taas ka duwan.
- Haddii aad isticmaashid **Plavix/Brilique/Efient,** nala soo xiriirtid hawl-galka ka hor.
- Haddii aad isticmaashid **Xarelto/Eliquis/Pradaxa,** jooji 2 maalmood hawl-galka ka hor.
- Haddii aad isticmaashid **Marevan**, waa inaad joojisid 3 maalmood ka hor hawl-galka iyadoo xinjiroobistana (INR) lagu koontaroolayo shaybaarkayaga. Sidaa awgeed waa inaad timaaddaa ugu yaraan 1 saac kahor baarista adigoo arrintaada ka sheegaya daaqadda qaabilaadda ee Rugta caafimaadka ee bukaan-socodka (medisinsk poliklinikk).
- Haddii qalliin lagugu geliyey waal-wadneed (hjerteklaff), **waa inaad lasoo xiriirtid rugta caafimaadka** si loo diyaariyo in lagaa beddelo Marevan oo laguugu beddelo Fragmin kahor baarista.

**Baarista laftigeeda**

Baaristu waxay socotaa 15 ilaa 45 daqiiqadood. Waxaad dareemi kartaa xanuun hawo-qabad ah inta lagu baarayo. Haddaad u baahatid dawo ku dejisa iyo mid xanuunka yareysa, waa lagu siinayaa. Sidaa darteed waa inaad timaaddid 20 daqiiqadood ballanka kahor si caagga xididka ku xiran ee dawada la mariyo loogu rakibo gacantaada.

**Baarista kadib**

Haddii lagu siiyey dawada dejisada ah, waa inaad kusii nasatid waaxda 1-2 saacadood baarista kadib. Maalinta lagu baaray baabuur ma kaxayn kartid.

Dhawr maalmood gudahood ayaa dhakhtarkii kuusoo diray baarista loogu sheegi doonaa natiijada baarista. Haddii nudayaal (cad yar oo jirro baaris ah) lagaa qaaday waxaa uu dhakhtarka kusoo diray ku helayaa jawaabta 4-6 toddobaad.

## Soo qaado cunto aad cuni kartid baarista kadib.

**Dhibaatooyin?**

Aad bay u yar tahay in dhibi ka timaaddo baarista malawadka iyo mindhicirka weyn. Marka lasoo goynayo nudayaalka ama la jarayo nabar, waxaa dhaawac yari ku samaysmaa xuubka. Aad bay u yartahay inuu dhiig-furan yimaado, laakiin wuu imaan karaa ilaa 3-4 maalmood baarista kadib. Inta badan asaga ayaa iska joogsada.

Haddii uu jiro shaki ah in mindhicirku dhaawacmay, waxaad la xiriirtaa dhakhtarkaaga ama dhakhtarka heeganka waaxda caafimaadka guud ee isbitaalkaan, telefoon 23 22 50 00.

Dhakhtarka isbitaalku ma qorayo warqadda jirrada ee maalinta lagu baaray, laakiin waxaa lagu siin karaa caddayn ah inaad halkaan u timid baaris caafimaad.